


Hay'adda Istaatistikada Qaranka (HIQ)



TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA

Abril 2021

Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Abriil 2021 ayaa ahaa 124.85, marka la barbardhigo 122.47 bishii Maarso 2021.

Isbedel bileedka, Abriil 2021, marka la barbar dhigo Maarso 2021, ayaa hoos u dhacay 1.94 boqolkiiba. Tan ayaa imaanaysa, marka labarbardhigo sare u kac bille ah oo gaaraya 2.17 boqolkiiba bishii Maarso 2021. Sare u kaca bileedka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha **Cuntada & Cabitaanada caadiga ah** (3.12 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka dhashay sare u kac ku yimid Cuntada & Cabitaanada caadiga ah (+3.22 boqolkiiba). Sare u kaca ugu badan ayaa ahaa Qudaarta (+7.08 boqolkiiba) iyo Miraha (+4.59 boqolkiiba) (Jaantuska 2).

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay (Abriil 2020 iyo Abriil 2021) ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB uu hoos u dhacay 4.21 boqolkiiba, Marka la barbardhigo 5.08 boqolkiiba ee 12kii bilood (Maarso 2020 iyo Maarso 2021).

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Abriil 2021 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Abriil 2021	
Tusaha bishan (Abriil 2021)	124.85
Tusaha bishii hore (Maarso 2021)	122.47
Tusaha sanadkii hore (Abriil 2020)	119.80
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	1.94%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	4.21%

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB

Isbedelka boqoleyda ee 12bilood

Tixraaca TSB

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Febraayo 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Abriil 2021

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Abriil 2021

Heerka sicir-bararka bisha Abriil 2021 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Abriil 2020 iyo Abriil 2021.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 4.21 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Abriil 2020 iyo Abriil 2021, marka la barbardhigo 12kii bilood ee Abriil 2020 iyo Abriil 2021 uu ahaa 5.08 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ayaa hoos u dhacay 1.94 boqolkiiba bisha Abriil 2021, marka labarbardhigo sare u kac dhan 2.17 boqolkiiba bishii Maarso 2021.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Abriil 2021.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay dhammaan qeybaha TSB.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 3.12 boqolkiiba, inta lagu jiray bisha Abriil 2021. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada quutul daruuriga ah oo qiimahoodu sare u kacay. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -1.91 boqolkiiba Abriil 2021. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -0.30 boqolkiiba Maarso 2021.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa laga dareemay hoos u dhac bille ah oo dhan 0.58 boqolkiiba intii lagu guda jiray Abriil 2021, marka la barbardhigo sare u kac gaaraya 1.40 boqolkiiba bishii Maarso 2021. Sare u kac sanadlaha ah ee bisha Abriil 2021 ayaa gaaray 12.00 boqolkiiba, marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah ee bishii Maarso 2021 oo ahaa 11.36 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB & Qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Abriil 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Abriil 2021 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda sanadlaha ahi sare u kacay 21.56 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka (+21.93 boqolkiiba) iyo kabaha (20.015 boqolkiiba) taasoo ka dhalatay sare u kac ku yimid dharka dumarka oo gaaray (+26.93 boqolkiiba), caruurta (23.15 boqolkiiba) iyo kabaha oo ahaa (+20.15).
- **Caafimaadka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah oo gaaraya 17.87 boqolkiiba bishii Abriil 2021. Sare u kaca waxa sababay qiima koror ku yimid adeega Cusbitalada oo gaaray (+45.79 boqolkiiba). Sare u kaca ayaa ka yimid adeega daweynta bukaanada oo noqday(+150.00 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 12.87 boqolkiiba bisha Abriil 2021. Sare u kaca waxaa sababay saameynta shakhsi ahaaneed oo qiimahoodu gaaray (+17.66 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Tima haajinta dumarka iyo Qurxinta caruusadaha (23.00 boqolkiiba).
- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaas** ayaa muujiyey sare u kac Sanadle ah oo gaaraya 12.00 boqolkiiba bisha Abriil 2021, sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa qiimaha kirada guryaha (19.67 boqolkiiba). qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha ay bixiyaan kireystayaasha sida, Appartment-ga (+30.23 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoysaska iyo Dayactirka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah 8.64 boqolkiiba ee Abriil 2021, marka la barbardhigo 8.59 boqolkiiba oo la diiwaan geliyey bishii Maarso 2021. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid agabka guryaha (+14.34 boqolkiiba).


Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Abriil 2021 (-)

- **Tubaakada** ayaa sameysay hoos u dhac sanadle ah oo gaaraya -6.30 boqolkiiba Bishii Abriil 2021. Sida la wariyey hoos u dhaca ugu weyn ayaa ahaa in qiimaha Qaadka uu ahaa mid aan fadhin bishii Abriil 2021, dhaqdhaqaaqa qiimaha tubaakada ayaa ah mid sabeynaya.

War bixin bileedka bisha **Abriil 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Abriil 2021 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Abriil 2021 (+)

- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda sare u kacay 3.12 boqolkiiba, inta lagu jiray bisha Abriil 2021. qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Qudaarta (+7.08 boqolkiiba) & Miraha (+4.59 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa qiimahoodu gaaray 2.67 boqolkiiba Abriil 2021, marka la barbardhigo 1.67 boqolkiiba oo la diiwaan geliyey bishii Maarso 2021 Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Tima haajinta dumarka iyo Qurxinta caruusadaha (+12.39 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Abriil 2021 (-)

Guud ahaan, majirin qeybaha TSB sare u kac la taaban karo oo bille ah Abriil 2021.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Abriil 2021 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Abriil 2021 TSB	Maarso 2021 TSB	Abriil 2021 TSB	% Boqolkiiba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiib Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan qeybaha TSB	100.00	119.80	122.47	124.85	1.94	4.21
Cuntada & Cabitaanada caadiga ah	46.04	130.17	123.81	127.68	3.12	-1.91
Tubaakadda	1.25	137.08	128.44	128.44	0.00	-6.30
Dharka & Kabaha	5.03	121.89	145.31	148.16	1.96	21.56
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska	23.41	103.88	115.68	116.35	0.58	12.00
Agabka Guryaha	2.93	103.70	112.61	112.65	0.04	8.64
Caafimaadka	5.00	132.12	153.63	155.73	1.37	17.87
Gaadiidka	3.77	110.83	107.73	109.65	1.78	-1.06
Isgaarsiinta	2.80	99.57	102.78	103.03	0.24	3.48
Hawo bedeshada & dhaqanka	1.00	98.54	101.90	103.75	1.82	5.29
Tacliinta	4.00	107.75	109.80	109.80	0.00	1.91
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	136.61	138.44	138.44	0.00	1.35
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	110.86	121.87	125.12	2.67	12.87

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

Soosaarida tan xigta


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Maajo 2021 waxaa la baahin doonaa 15 Juun 2021. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

War bixin bileedka bisha **Abriil 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistiskada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Abriil 2021 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadsooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **febraayo** 2021 (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia